



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASARAADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAH
AGAASINKA ISTAATISTIKADA QARANKA**



Warbixin Bileedka
TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA
Febraayo 2019

Warbixin kooban

Guud ahaan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Bishii Fabraayo 2019 ayaa ahaa **110.75**, halka uu ka ahaa **109.62** Bishii Janaayo 2019.

Isbedelka labada bilood u dhaxeeya ayaa sameeyey sare u kac dhan 1.03 oo ah heerka cabirka Badeecadaha, In kastoo Tusaha Sicirka Badeecadaha ee Bishii Janaayo 2019 uu hoos u dhacay -1.39 percent ee heerka Cabirka Badeecadaha. Qeybaha ugu muhiimsan ee uu qiimahoodu kacay ayaa ahaa Qeybaha adeega *caafimaadka* oo gaaray (+15.33%). Sare u kacaan waxaa sababay qiimaha Latalinta *Adeegyada Bukaana socodka*.

Guud ahaan Sicir Bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay marka loo eego Fabraayo 2019 ayaa Dhamaan Qeybaha Tusaha Sicirka badeecadaha hoos u dhacay 3.09% ee heerka cabirka sicir bararka, marka loo barbardhigo sare u kac gaaraya 3.18% ee bishii Janaayo 2019.

Shaxda 1: Sicir Bararka Badeecadaha; Fabraayo 2019 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Fabraayo 2019	
Tusaha bisha (Fabraayo 2019)	110.75
Tusaha bishii hore (Janaayo 2019)	109.62
Tusaha sanadkii hore bishaan oo kale	107.43
Isbedalka bilaha ah %	1.03%
Isbedalka sanadlaha ah %	3.09%

Sicirbararka ee tusaha sicirka Badeecadaha

Isbedelka boqolleyda ee 12 bilood ee la soo dhaafay

TSB

Tusaha = 100 @ December 2014



Source: Directorate of National Statistics

Heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Fabraayo 2019

Heerka sicir-bararka Bishii Fabraayo 2019, waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Fabraayo 2018 ilaa Fabraayo 2019,

Dhammaan qeybaha uu ka koobanyahay **TSB** ayaa sare u kacay 12 bilood ee la soo dhaafay 3.09% ee heerka cabirka badeecadaha marka loo barbardhigo bishii Janaayo 2019 oo ahaa 3.18%.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 1.03 Bishii Fabraayo 2019, marka loo barbar dhigo hoos u dhac dhan -1.39% ee la diwaan galiyey Janaayo 2019

Sicir bararka qeybo ka mid ah Badeecadaha, Fabraayo 2019


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada caadiga** ah, **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska cuntada lagu karsado** ayaa ah kuwa ugu muhiimsan uguna isticmaalka badan isla markaasna ah qeybta ugu miisaanka weyn badeecadaha oo dhan.

Cuntada iyo Cabitaanada caadiga ah ayaa qiimahoodu hoos u dhac dhan sameeyay -0.87%. Tan ayaa loo aaneynayaa Qiima Dhac qeybo ka mid ah Cuntada oo hoos udhacay sida ku cad warbixinta, sicir bararka ayaa hoos u dhac sanadle ah sameeysey kaas oo gaaray 1.66% bisha Fabraayo 2019, marka loo barbardhig sicirbarar sanadle ah oo ahaa 4.55% Bishii Janaayo 2019.

Qeybta Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska cuntada lagu karsado ayaa la diwaan galiyey sare u kac dhan 1.45% bishii Fabraayo 2019, halka Sicir bararka sanadle ah uu ka ahaa sare u kac gaaraya 0.92% heerka cabirka sicirbararka Fabraayo2019. Tan ayaa imaanaysa marka labarbardhigo hoos dhac sanadle ah oo ahaa -0.11% Janaayo 2019.

A. Qeybaha ugu balaaran ee isbedelka sanadlaha (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Fabraayo 2019 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicir bararku Kordhay (+):


- **Adeegyada Caafimaadka** ayaa waxaa ku korday 20.11% guud ahaan 12bilood ee lasoo dhaafay ,marka loo eego bishii Fabraayo 2019. Sare u kacaan waxaa sababay qeybta **Adeega Bukaana** socodka oo gaaray +31.33%.
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkoodu kor u kacay 9.68 % bisha Fabraayo 2019 marka loo barbardhigo Hoos u dhac sanadde ee Janaayo 2019 oo ahaa 8.68% herka cabirka sicibararka. Sare u kaca ugu balaaran ayaa ka yimid Kabaha.
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** qiimaha looga cunteeyo ayaa sameeyey sare u kac dhan 6.64 % bisha Fabraayo 2019. Marka loo barbardhigo hoos u dhac sanadde ah oo ahaa 5.06 % bishii Janaayo 2019. Qiima kororka ugu balaaran yaa ka yimid Qiimaha **Hoyga** oo garaay +3.76%)
- **Adeegyada Dheeriga ah** ayaa sameeyey sare u kac dhan 5.78% Fabraayo 2019 marka loo barbardhigo hoos u dhac sanadde ah bishii Janaayo 2019 uu ka ahaa 5.61%. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Daryeelka Dadka oo ahaa +9.31%).
- **Qiimaha Gadiidka** ayaa muujiyey sare u kac sanadde ah oo dhan 5.73% bisha Fabraayo 2019 marka labarbardhigo 3.45% ee la diiwan geliyey Janaayo 2019. Sare u kaca ugu balaaran ayaa ka yimid kala iibsiga Gawaarida oo gaaray 10.85%.

Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-):

- Guud ahaan, Majirin wax hoos u dhac sanadde ah oo muuqday bishii Fabraayo 2019.

B. Qaybaha ugu waa weyn ee isbedelka bilaha(TSB)

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qaybaha; Fabraayo 2019 (Dec 2014 = 100)



Qaybaha ugu weyn ee Sicir bararku ku kordhay bisha february (+):

- **Adeegyada Caafimaadka** ayaa waxaa ku korday 15.33% inta lagu guda jiray bisha Februray 2019. Sare u kacaan waxaa sababay qeybta **Adeega Bukaana** socodka oo gaaray(+30.71%)
- sicirka Tubaakada ayaa sare u kay 8.09% inta lagu guda jiray bisha Fabraayo 2019. Sare u kaca ugu balaaran ayaa ahaa qiimo koror ku yimid adeega bukan socodka oo gaaray (+12.34%)
-
- qiimaha gawaarida lagu raaco ayaa sare u kacay 2.49% inta lagu jiray bisha Fabraayo 2019. Sare u kaca ugu balaaran ayaa ka yimid kala iibsiga gawaarida oo ay ku koror tay(+5.88%)
- Isgaarsiinta ayaa samaysay sare ukac gaaraya 2.43% inta lagu guda jiray Fabraayo 2019. Sare u kaca ugu balaaran ayaa ka yimid qiimaha lagu dirsado teleefanada iyo faxiska oo gaaray (+8.35%).

Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Janaayo(-):

- Guud ahaan, Majirin wax hoos u dhac sanadkle ah oo muuqday bishii Fabraayo 2019.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qaybaha badeecadaha ee Fabraayo2019 ee habka COICOP (Dec 2014=100)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP		TSB Weight	Fabraayo 2018 Tusaha	Janaayo 2019 Tusaha	Fabraayo 2019 Tusaha	% isbedelka bishaan iyo bishiihore	% Isbedelka bisha sanadkaan iyo bisha sanadkii hore
	<i>Dhamaan qaybaha TSB</i>	<i>100.00</i>	<i>107.43</i>	<i>109.62</i>	<i>110.75</i>	<i>1.03</i>	<i>3.09</i>
01	Cuntada & Cabitaanka caadiga	46.04	110.80	113.62	112.64	-0.87	1.66
02	Tubaakooyinka	1.25	135.81	127.68	138.02	8.09	1.63
03	Dharka & Kabaha	5.03	100.16	108.85	109.85	0.93	9.68
04	Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska cuntada lagukariyo	23.41	106.24	105.69	107.22	1.45	0.92
05	Agabka Guryaha	2.93	101.21	104.30	104.50	0.19	3.25
06	Caafimaadka	5.00	98.47	102.55	118.27	15.33	20.11
07	Gaadiidka	3.77	102.39	105.64	108.26	2.49	5.73
08	Isgaarsiinta	2.80	94.38	94.37	96.66	2.43	2.41
09	Hawo bedelehada & dhaqanka	1.00	101.29	102.55	102.79	0.23	1.49
10	Tacliinta	4.00	101.20	100.45	101.54	1.09	0.34
11	Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	126.56	132.96	134.97	1.51	6.64
12	Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	102.00	107.68	107.89	0.20	5.78

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa lasoo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bil kasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee ku kalayaala afar suuq ee Magaalada Muqdisho.